**Sharciga lamba. 32 ee 18 Maarso 1972.**

**Dhismaha Urur-hantiyeedka Madax-bannaan ee Taakulaynta Dawladda.**

## GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Warqadda Kowaad iyo tan Labaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;
Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada Dawladda;
Marka uu helay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

## WUXUU MEELMAREIYAY

Xeerka soo socda:

### Cutubka 1aad

Dhismaha, hadafka iyo Abaabulka Urur-hantiyeedka Madax-bannaan;

### Qod. 1
### Dhismaha

1. Laga bilaabo 1 Janaayo 1972, waxaa la dhisay Urur-hantiyeed Madax-bannaan ee Taakulaynta Guud ee Dawladda oo hadda ka bacdi loogu yeeri doono "Urur-hantiyeed";
2. Urur-hantiyeedku wuxuu yeelanayaa, Maamul iyo Miisaaniyad gaara oo madax bannaan wuxuuna si toosa u hoos tagayaayaa Wasiirka Maaliyadda.

### Qod. 2
### Ulajeeddooyinka

Uruur hantiyeedku hadafkiisu waa in uu bixiyo:

1. Soo dejinta, soo saarista ama ka soo iibsashada suuqa:
   a) — qalabka la isticmaalo;
   b) — qalabka adeegga muddada gaaban;
   c) — qalabka iyo agabka muddada dheer lagu adeegto.
2. Iibka qalabka ku xusan lamba. 1.

Haddii aanu jirin sharci diidaya ama xaq Wakaalad ama Hay'ad kale ee Dawladeed, ulajeeddooyinka Urur-hantiyeedka qaab kastaba waxuu la mid noqonayaa hawlgallada Waaxda Taakulaynta Guud ee Dawladda ee ku cad Xeer Nidaamiyaha Taakulaynta Guud ee Dawladda oo lagu meelmariyay D.P.R. ee 18 Disembar 1962 lamba. 18 iyo isbaddalladii ka dambeeyay oo ah qayb ka mid ah Xeerkaas.

### Qod. 3
### Agaasimha Guud

1. Waa Madaxa Fulinta Urur-hantiyeedka, sida yuu qabo qod. 1 ee Xeerka 14 Setembar 1970 lamba. 56, oo ah hal Agaasime Guud oo lagu soo magacaabo Dekereeto Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka, kadib markii uu talo ku soo jeediyo Wasiirka Maaliyadda;
2. Dhaqaalaha la siinayo isla Dekereetdaas ayaa lagu goynayaa

**Qod. 4**
**Xilka Agaasimaha Guud**

Agaasimaha Guud wuxuu u xilsaaranyahay:

a) Waa wakiilka sharciga ee ee Urur-hantiyeedka Madaxa Bannaan wuxuuna masuul uga yahay Wasiirka Maaliyadda;
b) wuxuu hirgaliyaa tallaabooyinka deg-degga ah isagoo wargalinaya Wasiirka Maaliyadda;
c) wuxuu bixiyaa awaamiirta looga baahanyahay habsami u socodka hawlaha maamulka iyo xisaabaadka;
d) wuxuu ilbaadiyaa habsami u socodka hawlaha maamulka iyo xisaabaadka;
e) wuxuu horgeeyaa Wasiirka Maaliyadda, si uu oggolaado Miisaaniyadda ku-talagalka iyo Miisaaniyadda dhammaystirka oo ay wehliyaan warbixinta hubinta Hantidhowrka Guud;
f) wuxuu qabtaa dhammaan hawlaha maamulka caadiga;
g) wuxuu qabtaa hawlaha aan maamulka caadiga ahayn , marka uu oggolado Wasiirka Maaliyadda;
h) in uu u qaabeeye Wasiirka Maaliyadda tala soo jeedin ku wajahan abaabulka maamulka iyo xisaabaadka Urur-hantiyeedka.

**Cutubka 2aad**
Maareynta Maaliyadda

**Qod. 5**
**Raasamaalka**

1. Raasamaalka Urur-hantiyeedka wuxuu ka koobanyahay:

   a) hantida guurtdaa iyo maguurtada ee ay ku deeqday Waaxda Taakulaynta taariikhda uu Xeerkanu dhaqangalay;
   b) lacagta keydka ee kolba sanad Dekereeto Wasiirka Maaliyaddu uu ugu qoondeeyo si waafaqsan qod. 10 ee soo socda;
   c) hantida nooc kasta oo loo hibeeyo iyo cinwaan kale oo Urur-hantiyeedku leeyahay.
2. Taariikhda ay maarayntu Urur-hantiyeedku bilawdo waa in laga sameeyaa tusmo (inventario) tirada iyo qiimaha hantida guurtda iyo maguurtada iyo badeecadaha.

**Qod. 6**
**Miisaaniyadda Ku-talagalka**

1. Urur-hantiyedka madax bannaan waa in uu diyaariyaa, 31 Julay dhexdeed sanad kasta, miisaaniyadda ku-talagalka oo ku saabsan hawlgal kasta oo maaliyadeed;
2. Miisaaniyadda waa in laga helaa dhammaan dakhliga iyo dhammaan kharashaadka Urur-hantiyeedka tiradooda duuduubka aha waana in loo soo gudbiyaa Wasiirka Maaliyadda 15 cisho gudahood si loo oggolaado sanad kasta;
3. Miisaaniyadda waa in lagu soo raaciyaa Miisaaniyadda ku-talagalka Dawladda;
4. Hawlgalka maaliyadeed ee Urur-hantiyeedka waa in uu la jaan qaadaa hawlgalka maaliyadeed ee Dawladda.

**Qod. 7**
**Miisaaniyadda Dhammaadka**

1. Urur-hantiyeedku waa in uu diyaariyaa wixii ku siman 15 Maarso sanad kasta, miisaaniyadda ugu;
2. dambaysa ee ku u saabsan hawlgal kasta maaliyadeed ee la soo dhaafay;
3. Miisaaniyadda ugu dambaysa waa in laga helaa dhammaan xisaabaadka ee muhiimka u ah muujinta natiijooyinka maareynta iyo sidoo kale isbar-bar-dhigga daqliga iyo khasaaraha kolba jira;
4. Miisaaniyadda waa in laguu soo lifaaqaa Miisaaniyadda dhammaystiran ee Dawladda.

**Qod. 8**
**Heshiisyada**

Heshiis kasta oo qiimahiisu ka badanyahay Sh. 15.000, waa in la gala marka la helo oggolaasho qoraala ee Wasiirka Maaliyadda.

**Qod. 9**
**Diiwaanada Xisaabaadka**

Urur-hantiyeedku waa in uu yeeshee diiwaanada soo socda:

1. Diiwaanka soo gadashada iyo iibka, kuwaaso lagu muujinayo:
   a) tayada iyo tirada qiimaha midaysan ee alaabada la soo gatay ama wax soo saarka;
   b) tayada iyo tirada, qiimaha midaysan iyo qiimaha wadajira ee alaabada la gaday.

**Qod. 10**
**Natiijada Hawlgallada**

1. Wasiirka Maaliyadda wuxuu Dekereeto ku go'aamin karaa wixii faaiido uu helo Urur-hantiyeedku in uu ku wareejiyo dhammaan ama qayb ahaan, lacagta keydka ha ee Urur-hantiyeedka ku xusan qod. 5 ee Miisaaniyadda Dawladda;
2. Khasaaraha soo gaara Urur-hantiyeedka waxaa lacagteeda ku daboolaya Wasaaradda Maaliyadda.

**Qod. 11**
**Xisaab Celinta**

1. Marka laga soo tago arrimaha Xeerkaan uu sheegayo, wixii ku saabsan baarista xisaabadka ku-talagalka iyo waxa ku xiga, urur-hantiyeedka madax bannaan waxaa lagu dhaqayaa keliya Xeerka 1 Abriil 1970, lamba. 16 iyo isbaddaalladii ka dambeeyay, ee la xariira Wakaaladaha Dawladda

**Cutubka 3aad**
Shuruucda Gunaanadka

**Qod. 12**

1. Wasiirka Maaliyadda ayaa loo fsaxay in uu soo saaro xeer nidaamiye, ku saabsan abaabulka maamulka iyo xisaabaadka Urur-hantiyeedka.

**Qod. 13**
**Shaqaalaha**

1. Maqaamka sharciyeedka ee shaqaalaha urur-hantiyeedka waxaa lagu dhaqayaa shuruucda shaqaalaha rayidka ee Dawladda;
2. Uruur-hantiyeedku wuxuu kalo qoran karaa shaqaalaha uu u baahanyahay marka uu oggolaasho qoraala ka helo Wasiirka Maaliyadda iyo kolba awaamirta Dawladda.

**Qod. 14**
**Dhaqangalka**

1. Xeerkanu deg-deg ayuu u dhaqangalayaa waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga;
2. Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Dekeretooyinka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya;
3. Cid kasta waa in ay ilaalisaa una hoggaansato ka xeer dawladeed ahaan.

Muqdisho, 18 Maarso 1972.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**